

Sida Lagu Helo Macluumaadka Tallaalkaaga iyo kan Caruurtaada

Xiriirinta Macluumaadka Tallaalka Minnesota ee loo soo gaabiyo (MIIC) waa nidaam macluumaadka qofka ku diiwaan gelinaya hal keyd xattaa haddii ay tallaalka ku siiyeen daryeel bixiyaal caafimaad oo kala duwan ee ku sugan gobolkaan. In aad hesho diiwaankaaga iyo kan cunugaaga taas oo ay hayso MIIC waxay sahlayaan in xogta si fudu loo wadaago sababo la xiriira caafimaad, iskuul, socdaal ama shaqo wax ku saabsan. Sidoo kale waxay wax ka taraysaa kolka go'aamo muhiim ah la qaadanayo ee ku saabsan caafimaadka sida marka adiga ama ilmahaaga aad gaartaan xilliga tallaalka lagu taliyey.

Labo qaab ayaad ku heli kartaa xogta tallaalkaaga iyo kan ilmaahagaba. Waxaad soo dajisan kartaa I sidoo kalana daabacan kartaa nuqul PDF ah oo kuu gaar ah AMA waxaad codsan kartaa koobiga diiwaanka adiga oo u gudbinaya codsi rikoorka ku saabsan kooxda MIIC.

Ikhtiyaarka 1: Docket

Docket wuxuu dadka reer Minnesota ee haysta diiwaanka MIIC waxay si aamin ah ay ku heli karaan xogta taariikhda tallaalkooda iyo tan ilmahooda ee laga helo MIIC . waxaa loo isticmaali karaa:

- In aad ka fiirsato diiwaanka tallaalka ee app-ka.
- In aad aragto tallaalkada cusub ee app-ka ku jiray maalmo.
- In aad la wadaagto nuqul PDF ah oo diiwaanka tallaalkooda ah.

Si aad u bilowdo, soo deji app-ka bilaashka ah adoo ka baadhaya "Docket" ee ku yaala Apple App Store ama Google Play, ama aad [Docket \(https://docket.care/\)](https://docket.care/) si aad u soo dejiso app-ka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida loo habeeyo oo loo isticmaalo Docket app booqo Docket iyo MIIC Tallaalka Diiwaanada (www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/docket.html).

Ikhtiyaar 2: Codso nuqul diiwaanka ah

Dadka reer Minnesota ee doonaya in ay helaan diiwaanka tallaalka qaab PDF ah wuu sameyn karaa sidaas asaga oo booqanaya halkaan Find My Immunization Record (www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html) si uu MIIC ugu gudbisto codsi diiwaanka ah.

Waaxda Caafimaadka Minnesota
Xiriirinta Macluumaadka Tallaalka Minnesota (MIIC)
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5207
health.miichelp@state.mn.us
www.health.state.mn.us/miic

02/28/2024

Si aad xogtaan ugu hesho qaab kale, fadlan wac: 651-201-5207. (Somali)